



Macluumaad

loogu talagalay mas'uuliyiinta ilmahoodu 15 saacadood ku qaataan dugsiga barbaarinta.

Faafitaanka infekshanku wuxuu adkeynayaa hawlgaladayada.

Adiga oo ay caruur ku dhigato dugsiga xanaanada 15 saacadood asbuucii, ayaa saameyn ku yeelan kara.

Hawlahu waa ay sii socon doonaa sidii caadiga ahayd intii suurtagal ah.

Haddii ay adkaato ka shaqeynta dugsiga xannaanada, waxaa habboon in si ku meelgaar ah loo xiro booska carruurta ay waalidkood guriga ku sugan yihiin. In ay waalidkaas carruurta guriga ku hayaan.

Waa in uu maamulaha gaaro go'aanka ka dib qiimeynta guud ee xaaladda shaqaalaha dugsiga xannaanada iyo baahida ay masuuliyiintu u qabaan boos-xannaanada shaqada.

Go'aannada waxaa la sameeyaa sida caadiga ah muddo gaaban oo dhawr maalmood ah markiiba. Maaddaama xaaladdu hadda tahay, waxay noqon kartaa muddo xoogaa dheer oo ku saleysan faafida socota iyo faafitaanka infekshinka oo sii kordhaya.

Tani waxay khuseysaa dhammaan iskuuladaa:

- Xaaladda astaamaha hargabka ama jirada, canuggu wuxuu joogaa guriga
- Cunnuggu waa inuu joogaa guriga illaa ilmuhu gebi ahaanba astaamo la'aan + 2 maalmood oo dheeraad ah. Hadday 7 maalmood ka soo wareegtay xanuunka kadhib oo labadii maalmood ee u dambaysay aanay qandho lahayn oo uusaan muujiniin astaamo, ilmuhu wuxuu ku noqon karaa dugsiga barbaarinta.
- Ogeysii dugsiga xannaanada haddii ilmuhu jiran yahay oo uusan imaan dugsiga barbaarinta
- Markuu cunugga bogsado, la xiriir dugsiga barbaarinta kahor intaadan soo noqon.
- Haddii ilmuhu oo leh astaamaha hargabka u yimaado dugsiga xannaanada, waa lagula soo xiriiri doonaa si oga waado dugsiga.

Örjan Abrahamsson
Madaxa Iskuuladaa Sollefteå